

Ardaygaagu

waxa uu ka

faa'iidayaa

udoodistaada!

Dhammaan ardayda waxay ka faa'iideystaan taageerada iyo u doodista qoyskooda iyo daryeelayaashooda. Ardayda isku aqoonsada inay yihii ama leh xubno katirsan qoyska oo isu aqoonsada inay yihii dumarka isu galmodaa, ragga isu galmodaa, ragga iyo dumarka labadaba u galmodaa, jinsi badale, jinsi laawe, labeeb, laga roone iyo/ama mid kamid ah aqoonsiyada badan ee qeexayo dadka aanan lahayn jinsi toos ah ama cayiman (LGBTQIA+) kama duwana.

Taageerooyinka dugsiga dhediisa

Cilmi baaris ayaa muujisay in ardayda LGBTQIA+ ay caafimaad iyo natijjo waxbarasho oo ka wanaagsan leeyihii marka ay afartaan waxyaabood kala kulmaan dugsiyada.

1. Manhaj loo dhan yahay
2. Naadiyada ardayda LGBTQIA+
3. Siyaasado loo dhan yahay
4. Barayaal taageera

Ardayda jinsiga badalay iyo kuwa jinsiga caadiga ah aanan ahayn

Ardayda jinsiga badalay iyo kuwa jinsiga caadiga ah aanan ahayn waxaa magacyadooda iyo magac u yaaladooda ixtiraami doona dhammaan shaqaalaha iyo ardayda, waxa ay kaeqeyb qaadan karaan isboortiga iyadoo lagu saleynayo aqoonsiga jinsigooda ee joogtada ah iyo adeegsiga tashiilaadka u dhigma aqoonsiga jinsigooda. Haddii ardaygaagu uu yahay arday jinsiga badalay ama jinsiga caadiga ah uusan ahayn, diiwaankiisa dugsiga waa la cusboonaysiin karaa si uu uga tarjumo magaciisa, jinsigiisa iyo magac u yaalkiisa.

Taageerada jinsiga iyo kala-guurka

Ardayda iyo qoysaska badankoodu waxay u baahan yihii xoogaa caawimaad dheeraad ah oo ku saabsan kala-guurada waaweyn. Canugaagu waxa uu caawimaad kaheli karaa shaqaalaha dugsiga si uu u qorsheeyo una taageero kala guurka jinsiyeed ee bulshada. Waxa ay noqon kartaa mid aad qarsoodi u ah ama aad u shaacsan – qofkasta wuxuu leeyahay baahiyo gaar ah.

Kahor ama kadib kala guurka jinsi, ardaygaagu waxa uu ka faa'iideysan karaa taageero dheeri ah oo ku saabsan jinsiga ee dugsiga. La hadal maamulaha ama lataliyaha cunuggaaga si ay u caawiyaan.



Siyaasadda Kaeqeybgelinta Jinsiga:
spps.org/genderinclusion

U Doodista

Ardaygaaga

ama Qoyskaaga

katirsan

LGBTQIA+



Out for Equity
1930 Como Ave, St. Paul, MN
spps.org/outforequity • outforequity@spps.org

Taageero

weydiiso!

Lahadalka barayaasha iyo maamulayaasha

Waxbaridda ardayda oo dhan waa shaqada barayaasha oo dhan. Hadana barayaal iyo maamulayaal aad u tiro yar ayaa tababaradooda wax kaga bartay jinsiga iyo kala duwanaanta galmonimada. Barayaasha iyo maamulayaasha ardaygaaga kala hadal taageerooyinka ardaygaaga LGBTQIA+ ee uu ubaahan doono inuu ku koro!

Shan sababood oo waaweyn

Waxaa jiro shan sababood oo waaweyn oo aad macalimiinta iyo maamulayaasha ku siiso sharraxaada sababta ay tahay ardaygaagu inuu helo fursadaha aad la rabto, cilmi baarisna waxay sheegeysaa inay ka caawin doonto inuu koro:

1	Kala duwanaanta iyo sinnaanta
2	Badqabka ardayga
3	Caafimaadka jismi iyo dareen
4	U diyaargarowga kulleejka iyo shaqada
5	U hoggaansanaanta siyaasadaha iyo shuruucda

Ardaygaagu waxa

uu mudan yahay

manhaj loo dhan

yahay oo sugar!

LGBTQIA+ oo lagu dhex daro fasallada

Fasalki ay doonaan ha noqdaane, ardaydu waxa ay si wanaagsan wax u bartaan marka ay dareemaan matalaada sugar iyo taageerada dadka iyaga oo kale ah. Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul, fursadaha manhaj loo dhan yahay waxa ay ka bilowdaan waxbarashada carruurnimada hore waxa ayna sii socdaan ilaa waxbarashada dadka waaweyn.

Maadooyinka oo dhan waxa ay noqon karaan kuwo loo dhan yahay

Kamid noqoshada LGBTQIA+ waxa ay kadhici kartaa maado kasta. Inkastoo xiisadaha faniga luqadda iyo taariikhda ay lahaayeen kamid noqosho badan, hadana sidoo kale waxaa jiro fursado looga mid noqdo sayniska, xisaabta iyo barashada jirdhiska.

Kamid noqoshada caafimaadka ayaa si gaar ah muhiim u ah. Xaqiqidii, cilmi baaristu waxa ay soojeedineysaa in ardayda jinsiga caadiga ah ay sidoo kale waxbadan ku baran karaan fasallada ay u dhan yihiin jinsiga iyo kala duwanaanta galmonimada.

Aadiyada ardayda LGBTQIA+

Dugsiyada sare ee kujiro Dugsiyada Dadweynaha ee Saint waxa ay leeyihii Gender and Sexuality Alliances (Dalladaha Jinsiga iyo Galmonimada, GSAs). GSAs waxa ay bixiyaan fursadaha waxbarashada, udoodista iyo isku xirka bulshada. Dugsiyada hoose qaarkood waxay leeyihii shirarka LGBTQIA+ ama kooxo bulsheed. Faahfaahinta weydiis shaqaalaha ku sugar dugsigaaga!

U istaagga howlaha Sinaanta

- Waalidka Jinsiga iyo Kala Duwanaanta Galmada
- Golaha Latalinta (GSDPAC)
- Q-Feestada Raadinta Dhallinta Jinsi Laawaha
- Shirka Dhallinyarada
- Qoob-ka-ciyaarka Qaanso Roobaadka Dugsiga Dhexe
- Sharafta Dhalinyarada
- Sharafta iyo Aqoonsiga Kuwa Sare
- Xiriirkha Shaqaalaha Qaanso Roobaadka
- Iyo kuwa kale oo badan!

